## Sidee ku Helaa NLRB si ay u Qabato Doorasho Qarsoodi ah?

Si loo bilaabo hannaanka doorashada, codsiga waxaa sidoo kale lagu xareyn karaa si elektaroonig ah iyadoo la sii marayo shabakada dadweynaha ee NLRB: https://apps.nlrb.gov/chargeandpetition/#/. Codsiga iyo dukumeentiyada kale ayaa sidoo kale suurtagal ah in lagu xareeyo xafiiska NLRB ee kuugu dhow. Codsiga waa inuu tusaa inuu leeyahay taageerada ugu yaraan 30% shaqaalaha qaybta ku habboon. Unug habboon waa koox shaqaale ah kuwaaso si macquul ah isula meel dhigay islamarkaana wadaaga danaha shaqo ee ka dhexeeya ujeedooyinka matalaada ururka.

Kadib marka codsiga la xareeyo, NLRB waxay la shaqayn doontaa xisbiyada si ay u helaan heshiis khuseeya kooxda ku habboon codbixinta, taariikhda, waqtiga, goobta, iyo faahfaahinada kale ee doorashada, oo ay ku jiraan baahida loo qabo ogaysiisyada afka qalaad iyo cod bixinta. Haddii xisbiyada ay ku heshiin waayaan qaar kamid ah faahfaahimahan, NLRB waxay qaban doontaa dhageysi islamarkaana agaasimaha gobolka wuxuu dajin doonaa shuruudaha si waafaqsan xeerarka iyo go'aamada NLRB.

## Ma la aqoonsan karaa Urur aan laheyn Doorasho NLRB?

Marka lagu daro doorashooyinka ay qabato NLRB, shaqo bixiyaha ayaa si ikhtiyaari ah u aqoonsan kara urur haddii ururku codsado aqoonsi oo uu ku yabooho taageero aqlabiyad ah isagoo ku muujinaya kaarar ogolaansho oo saxeexan mise siyaabo kale. Heshiisyadan waxaa loo sameeyay si ka baxsan nidaamka NLRB.

## Sidee kaloo NLRB ii Caawin kartaa Aniga?

NLRB waxay ka jawaabi kartaa qaar badan oo la xiriira weydiimahaaga shaqada. Haddii aad eedeyn xareyso, NLRB waxay si buuxda u baari doontaa eedeyntaas waxayna soo saari doontaa go'aan kusaabsan mudnaanta eedeymahaaga. Haddii arrimaha shaqadaada la xiriira ay ku lug yeeshaan sharciyo kale, wakiilka NLRB ayaa kuu gudbin doona wakaalada mise wakaalad ku haboon. Xaaladaha qaar, eedeymaha waxaa suurtagal ah inay ku lug yeeshaan wax kabadan hal sharci, iyo dhowr gobol iyo/mise wakaalado fadaraal oo laga yaabo inay ku caawin karaan.

## Sidee ku Helaa Xafiiska NLRB ee iigu Dhow mise la xiriiraa NLRB si la ii Caawiyo?


NLRB waxay leedahay garoomo leh xafiisyo oo ku yaal meelo badan oo dalka oo dhan ah. Waxaad la xiriiri kartaa xafiiska kuugu dhow adigoo:


- Galaya shabakadda NLRB, oo ka kooban ciwaanka iyo lambarka telefoonka xafiiska garoon kasta: **www.nlrb.gov**.
- Iyadoo la isticmaalayo App-ka Moobilka NLRB, kaasoo lagala soo dagi karo IOS mise Android. Iskaan mari furaha QR si aad usoo dajiso App-ka, kaasoo ka kooban ciwaannada iyo lambarada telefoonnada ee dhamaan xafiisyada goobaha NLRB.
- Wacitaanka lambarka bilaashka ah ee NLRB: **1-844-762- NLRB (6572)**. Waxaa si toos ah laguugu gudbin doonaa xafiiska kuugu dhow. Soo wacayaasha dhagaha la' mise dhagaha jiga ee raba inay la hadlaan wakiilka NLRB waa inay iimayl usoo diraan relay.service@nlrb.gov. Wakiil NLRB ayaa iimayl u diri doona codsadaha isagoo wata tilmaamo kusaabsan sida loo qabsado ballan wicitaanka adeegga gudbinta.

1015 Half Street SE
Washington, D.C. 20570
844.762.NLRB • 844.762.6572

www.nlrb.gov
Twitter: @NLRB
www.facebook.com/NLRBpage








GUDDIGA XIRIIRKA SHAQADA QARANKA

# Ilaalinta Xuquuqaha Shaqaalaha

www.nlrb.gov

ADEEG BISHAASH AH
844.762.NLRB
844.762.6572

**Buuggan waxa loogu talagalay in uu sharraxaad guud ka bixiyo shaqaalaha kusaabsan XUQUUQAHA GOOBTA SHAQADA ee hoos yimaada Xeerka Xiriirka Shaqaalaha Qaranka**

## Waa maxay Guddiga Xiriirka Shaqaalaha Qaranka?

Guddiga Xiriirka Shaqaalaha Qaranka (NLRB) waa wakaalad fadaraal madax bannaan oo ka tirsan Dowladda Mareykanka. NLRB waxay leedahay labo shaqo: (1) fulinta sharciyada si loo hubiyo in shaqaaluhu ay si xor ah u gudan karaan xuquuqahooda hoos yimaada NLRA iyagoo aan wax faragalin ah laga helin shaqo bixiyaha mise ururada iyo (2) qabashada doorashooyin qarsoodi ah oo ay shaqaaluhu ku dooran karaan inay rabaan inay helaan urur iyaga matala. Sharciyadani waxay khuseeyaan badanaa shaqo bixiyaha aan dawliga ahayn ee ku sugan goobaha shaqada ee Maraykanka, oo ay ku jiraan kuwa aan faa'iido doonka ahayn, ganacsiyada aan ururka ahayn, iyo ganacsiyada gobollada ee leh sharciyada "Xuquuqda Shaqada".

## Waa maxay Xuquuqaheyga hoos yimaada NLRA?

Guud ahaan, shaqaaluhu waxay xaq u leeyihiin inay isku yimaadan si ay u wanaajiyaan musharkooda iyo xaaladahooda shaqo, iyagoo aan urur ku jirin mise aanu ku jirin. Tani waxay la micno tahay inaad:

- Kala hadasho xaaladahaaga shaqo asxaabtaada, dadweynaha, warbaahinta, mise ururka (balse waa inaadan samayn hadal si ula kac ah mise xaasidnimo been abuur mise aad ku kacdo akhlaaq aad u xun, af lagaado ah, mise carqalad habsocodka goobta shaqada).
- La qaado tallaabo mid mise in kabadan saaxiibadaada shaqo si aad u wanaajiso xaaladdaada shaqo adiga oo, tusaale, si toos ah kor u qaadaya cabashooyinka la xiriira shaqada shaqo bixiyaha mise wakaalada xukuumada, mise caawimaad ka raadsanaya urur.
- Ku biirto urur mise qaado tallaabooyin waqtiga aan shaqada ahayn si looga caawiyo ururka inuu noqdo wakiilka shaqaalaha ee goobtaada shaqado, oo aad ka caawiso ururka inay heshiis ku helaan si ay u dajiyaan mushaharkaaga iyo xaaladaha kale ee shaqada.
- Dooro inaadan samayn mid kamid ah waxyaabahan.

## Waa maxay Tusaaleyaasha Qaar ee kamid ah Waxyaalaha aanu Samayn karin Shaqo bixiyaha?

- Ku ceyriyo mise hoos kuu dhigo, shaqada kugu silciya, mise kuugu hanjaba inaad samayso mid kamid ah waxyaalahan, sababtoo ah waxaad isticmaashaa mid kamid ah xuquuqahaaga hoos yimaada NLRA, oo ay ku jirto inaad cabasho u keento NLRB mise kala hadasho wakiilka NLRB cabashooyin.
- Kaa mamnuuco inaad dadka kale kala hadasho mushaharkaaga, xaaladahaaga shaqado, mise urur inta lagu jiro waqtiyada aan la shaqaynin, sida kahor mise kadib shaqada mise waqtiyada nasashada.
- Kaa mamnuuco inaad maareyso agabka ururka waqtiga aan la shaqaynin iyo meelaha aan lagu shaqayn, sida meelaha baabuurta la dhigto iyo qolalka nasashada.
- Kuugu hanjaba inuu xiro goobtaada shaqada haddii shaqaaluhu doorto urur matala iyaga.
- Kuu ballan qaado mise kuugu deeqo dallacaad, mushahar kordhin mise dheefo kale si aad u niyad jebiso taageerada ururka.
- Kaa mamnuuco inaad xirato koofiyadaha ururka, galuusyada, funaanadaha iyo biinanka goobta shaqada marka laga reebo xaalado gaar ah.
- Ku weydiiyo wax kusaabsan ururadada taageeryashooda mise hawlaha qaab kaa niyad jabin kara inaad waxyaalahaas samayso, mise ku basaaso mise duubo howlaha nabdoon ee ururkaaga iyo isu imaatinka.

## Waa maxay tusaaleyaasha qaar kamid ah waxyaabaha ururada qaban Karin?

- Kuu cagajugleeyaan inaad waayi doonto shaqadaada mise dheefo kale haddii aadan taageerin ururka.
- Goobta shaqada ee ururka, inay kuu diidaan hannaanka cabashada sabab ah waxaad cambaaraysay madaxda ururka mise kama mid tihid xubnaha ururka.
- Kuu diidaan inay kuu gudbiyaan hoolka shaqaaleysiinta sabab midab takoorid awgeed.
- Ku dhiiri galiyaan shaqo bixiyaha inuu ku takooro sabab ah waxaad dhaleecaysay madaxda ururka mise inaadan ahayn xubin kamid ah ururka.

## Maxaan Samayn Karaa Haddi aan Aaminsanahay In Lagu Xadgudbay Xuquuqahayga?

Haddii aad aaminsantahay in shaqo bixiye mise urur uu ku xadgudbay xuquuqahaaga, waa inaad isla markaaba la xiriirtaa NLRB. Waxaad awoodi doontaa inaad la hadasho wakiilka NLRB oo aad waydiiso xadgudubyada suurtagalka ah iyadoo shaqo bixiyaha, ururkaaga, mise cid kale aan loo sheegin wax kusaabsan weydiimahaga. Haddii aad doorato, waxaad xareyn kartaa dacwadda habdhaqanka shaqada ee aan cadaaladda ahayn adigoo sheegaya in shaqo bixiyaha mise urur ay ku xadgudbeen xuquuqahaaga hoos yimaada NLRA, mise xuquuqda shaqaalaha kale. Nuqul kamid ah dacwadda ayaa la siin doonaa shaqo bixiyaha mise ururka kaasoo ah mawduuca dacwada. Ma baari karno eedeymaha iyadoo aan dacwad la gudbin.

Waxaad xareyn kartaa dacwad adiga oo booqanaya xafiiska, iimaly ahaan, telefoon ahaan, mise qaab eletroonig ah iyadoo loo marayo shabakada dadweynaha ee NLRB: https://apps.nlrb.gov/chargeandpetition/#/. Hadii aad u baahantahay cawinaad, wakiilka guddiga ayaa ku caawin doona si aad u buuxiso foomka daawada. Ma jirto wax kharash ah oo kugu kacaya inaad xerayso dacwad shaqo oo aan cadaalad ahayn, sidoo kale baahi qareen.

## Goorma Ayaan La Xiriiri karaa NLRB?

Haddii aad aaminsantahay in shaqo bixiye mise urur uu ku xadgudbay NLRA oo aad rabtid in aad xareyso dacwad shaqo oo aan cadaalad ahayn, guud ahaan waa in aad dacwad la xareysataa NLRB lixda bilood gudahood ee xadgudubka dhacay. NLRA waxay ka koobantahay lix bilood oo xeer xaddidaad ah, taasoo micnaheedu yahay in shaqo bixiyaha mise ururka aan lagu qaadi karin masuuliyadda anshaxa taasi oo dhacday wax kabadan lix bilood kahor xeraynta dacwada.

## Maxaa Dhacaya Kadib marka la Xareeyo Dacwadaha Ku dhaqanka Shaqada aan Cadaalada ahayn?

Wakiilka guddiga ee mid kamid ah xafiisyada goobta ayaa loo xilsaari doonaa inuu baaro dacwada. Wakiilka Guddiga wuxuu guud ahaan ka qaadi doonaa bayaannada sirta ah laga bilaawo qofka dacwada gudbiyay iyo markhaatiyada kale, waxuuna ururin doonaa dukumeentiyada kale ee khuseeya, sida ficilada anshax marinta, waraaqaha joojinta, siyaasadaha shaqo bixiyaha, iyo kuwo kale oo badan (etc). Shaqo bixiyaha iyo ururka ayaa markaa la weydiin doonaa inay keenaan markhaatiyada dhaarta qarsoon iyo dukumeentiyada lagu taageerayo difaacyadooda. Kadib marka la tixgaliyo caddayntan, haddii Agaasimaha Gobolka NLRB uu ogaado in shaqo bixiyaha mise ururka ay ku xadgudbeen NLRA, isaga mise iyada waxay isku dayi doonaan inay xalliyaan kiiska kahor intaysan soo saarin cabasho rasmi ah iyo inta aan maxkamad la saarin. Heshiisku waxa ku jiri kara ku soo noqoshada shaqaalaha laga ceyriyay shaqadiisa mise shaqadeda, bixinta mushaharka lumay, ka noqoshada ficillada kale ee aan haboonayn, iyo/mise dhajinta ogaysiis la talin shaqaale ee goobta shaqada ee xuquuqdooda.

Haddii maxkamad loo baahdo, qareenka NLRB ayaa kiiska u soo bandhigi doona garsooraha sharciga maamulka waxaana suurtagal ah inuu u baahdo shaqaalaha iyo kuwa kale si eey uga makhaati furaan maxkamada. NLRB wax dacwad ah kama qaado adeegyadan. Haseyeeshee, haddii aad rabto inaad yeelato qareen kuu gaar ah, waad yeelan kartaa.